



Ciyaaraha Goolafka

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. *Tilmaamahaan kormeerka ganacsigaaga gaariyaasha ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.*

Aagaga Dhaqista

- Qoonso dhammaan meelaha biyuhu ku aruuraan ee aagaaga dayactirka si loo hubiyo in biyaha aan lagu shubin meelaha daadku maraayo.
- Si ku meel gaar ah u dabool meelaha u dhow marinnada daadka si looga hortago in biyaha dhaqmadu galaan nidaamka qaada biyaha daadka.
- Ku dhaq saladaha kubada goolafka iyo mashiinnada cawska yara meelaha shabaqa leh (dagaandega, jaayga, iwm.)
- Marka aad ku dhaqayso gaari gacannada goolafka iyo caws jiidayaasha muddo kadib, ku aruuri oo ku hay dhammaan biyaha dhaqmada si loogu daadsho qaab waafaqsan dhammaan sharciyada quseeya iyo xeerarka ama faadinta biyaha qashinka ah oo lagu daadsho meelaha siman sida dhulka falan.
- Qabo oo ku shub kiimikooyinka ka yimaada matoorka iyo biyaha lagu dhaqo. U daadi qaab waafaqsan sharciyada iyo xeerarka quseeya.
- Yaree ama baabi; adeegsiga saabuunnaha, waxyaabaha saliida xaaqa, ama agabka kale ee nadiifinta.

tilmaamo dheeraad ah >>>

waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.



Aagaga Dhaqista


- Si ku meel gaar ah ugu dabool waxyaabaha kasoo daata dayactirka qalabka si looga hortago daadashada, dhashuunka, ama daadku inuu galo nidaamka qaada biyaha daadka.
- Ku dhaq qalabka lagu buufiyo sunta cayayaanka meel u gaar ah, waayo biyaha dhaqmada waxaa ku jiri kara qashinka sunta cayayaanka. Haku dhaqin qalabka buufinta sunta cayayaanka meel u dhow baraha biyaha ama marinnada biyaha daadka.

Wasaqda Khatarta ah

- Tusaaleyaasha agabka guud ee khatarta wasawda ah waxaa ku jira gasoliinta, naaftada, riinjiga, qaybaha agabka dayactirka, baytariyada, iyo miireyaasha. Ganacsiyada maamula agabka khatarta badan ee cadadka la qaadi karo ah ayaa laga doonayaa Qorshaha Maaraynta waxyaabaha khatarta ah ayagoo adeegsanaaya Nidaamka Warbixinta Bii'ada ee California.
- U maaree wasaqda khatarta ah si waafaqsan tilmaamaha cabirka, sharciyada, iyo xeerarka.
- Si amaan ah u xir aagaga kaydka qashinka khatarta ah. Qasacyada qashinka khatarta ah waa in afka laga xiraa aysana lahayn meelo dhashuumaaya waana in lagu qoraa magaca iyo taariikhda agabka.
- Ku hay taangiyada iyo fuustooyinka xaalad wanaagsan. Kormeer ku samee aagaga kaydka saliida si joogto ah si aad uga eegto dilaac iyo daadasho.

Maamulka Qasacyada Qashinka

- Qasacyada waawayn ee qashinka waa in la dhigaa meel u jirta ugu yaraan 50 fiid meelaha u jira marinka biyaha daadka, meelaha biyhu ku shubmaan, iyo marinnada biyaha.
- Ka difaac qasacyada waawayn ee qashinka daadka biyaha roobka adoo adeegsanaaya biyo xireennada ku meel gaarka ah ee ka samaysan jawaannada ciida, jawaannada qaruuraxa, ama xakabadaha.

-  Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Difaaca harka biyaha ee Ismaamulka (WPO). **Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.**

Waad ku mahadsan tahay

inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.